

Kaalay oo nagu soo biir!

4^{*}

Waxaanu jeclaan lahayn carruur badan, dhalin yaro iyo waayeel inay ku soo biiraan naadiyada 4H. Warsidahan waxa uu bixinayaa macluumaad badan oo ku saabsan waxa 4H ay tahay, nooca hawlaha aad ka qayb geli karto iyo sida aad xubin u noqon karto.



التعلم بالممارسة العملية
LĒARNING BY DOING
BARO ADOO SAMAYNAYA
'ሰምስሰራሕ ምምሃር'
LÆRE VED Å GJØRE

Ku soo dhowow 4H!

Gudaha Norway, 4H waxay leedahay wadarta ugu badnaan 13,000 oo xubnood ugu dhowaan 600 naadiyada 4H iyo 50 beeraha 4H. Ururka waxaa maamula xubnaheeda. Tan macnaheedu waxa weeye in xubnaha 10-28 kooxda jirta ee go'aamisa waxay tahay hawlaha ay qaban doonto naadigu. 4H sidoo kale waxaa taageera la taliyayaal waayeel ah. Waxaanu u bixinaa hawlaha tayada sare leh si badbaado leh, ka xor ah maandooriyaha iyo deegaanka buslahadda.

Dhabarka warsidahan, waxaad ka heli doonta amacluumaakda xidhiidhka naadigaaga maxaliga ah ee 4H.

Waa maxay naadiga 4H?

Naadiga 4H waa goob muhiim ah gudaha deegaanka maxaliga ah. Waxaan habbaynaa hawlaha sida socodka deegaanka, hawsha masraxa, xiirfadaha, tartanada kubbada laliska, fiidanka kullanka bulshadda, kaam dhisashada, booqashooyinka beerta iyo wax karinta. Hawlaha waxaa doorto xubnaha lafahooda. Kullanka sanadlaha ah waxaa la qabtaa sanad kasta, kaas oo qorshayaasha loo qaato qaab dimuqraadi ah ah iyo guddina la doorto. Guddida naadiga waxay ka koobanyihiin xubnaha u dhexeeya da'aha 10 ilaa 18, oo waxay ka masuuliyihiin maamulka naadiga sanadka oo dhan. Xaga kullanka sanadlaha ah, xubnahu sidoo kale waxay doortaan lalataliyayaasha naadiga oo qof wayn ah kaas oo siita talo, caawimo iyo tilmaan. Kuwan waa waalidka kale ama dadka waa wayn ee kale oo wada jir ula maamula naadiga dhalinyarada, iyaddoon lahayn wax lacag bixin ah.

Sawirka: 4H Sogn og Fjordane



Sawirka: 4H Sogn og Fjordane





Sababteen ugu biirayaa?

Inaad maad la qaato kuwa kale! 4H waxay u furantahay qof kasta, iyaddoon loo eegin luqadda, dhaqanka, sinjiga ama naafanimada. Si wada jir addoo ula jooga saaxiibada, waxaad heli doontaa waaya aragnimooyin cusub oo waxaad baran doontaa casharadda nololaha. 4H waxay siisaa xubnaha fursadda horumarka shakhsiyeed gudaha beesha bulshadda. Ma jiraan shuruudo gaar ah oo lagu noqdo xubin. Sidii xubin 4H, waxaa kuu fududaan doonta inaad la kullanto dad cusub oo aad samayso saaxiibo cusub. Badanka xubnaha waxay da'adoodu u dhaxaysaa 10 iyo 18, laakiin dadka waa wayn sidoo kale waxaa lagu soo dhowaynayaa inay ku biiraan sidii mutadawiciin.



Ka qayb galka caafimaad ahaan iyo waxbarasho ahaan!

Dareenka qayb ka noqoshada shay, la wada leeyahay iyo lahaanshaha meel si la rumaysan karo waa muhiim. Dhexda 4H, xunbahu waxay horumariyaan aqoonsigooda, is ixtiraamkooda iyo dareenka lahaanshaha. Tani waxay muhiim u tahay labbadaba caafimaadka jidhka iyo maskaxda. Way fududahay in jidh ahaan lala firfircoonaano si wada jir ah kuwa kala halkii keli laga firfircoonaan lahaa. Waxaad baran doontaa wax badan oo ku saabsan deegaanka, beerida, shaqada urureed iyo dimuqraadiyada dhexda 4H.

Halku dhega 4H waa
**“ku barashada
samaynta”**



Mashruuca 4H!

Sanad kasta xubnaha 4H waxay dhammasyiraan mashruuc, miduun keligood ama wada jir lala sameeyo kuwa kale gudaha naadiga 4H. Mashaariicda waxaa loo kala qaybiyaa qaybaha deegaanka, dhaqanka, bulshadda iyo caafimaadka, iyo xubnaha nafahooda oo doorta mowduuca mashruucoda. Xubnahu waxay bartaan waxbadan oo waxyaabahaha cusub ee ka yimid ka shaqaynta mashruucyadan. Badanka xubnaha 4H waxay lahaan doonaan kaaliyaha mashruuca kaas oo siin doona talo iyo tilmaan inta la socdo oo dhan.

Sawirka: 4H Sogn og Fjordane



Ka qayb qaado, ku tabaruc oo la kullan dad cusub!

4H waxaa maamula ugu badnaan dadka mutadawiciinta ah. Kuwan waa waalid iyo kuwa kale ee u shaqeeya danta naadiyada 4H, kuwaas oo mutadawac ahaan ugu shaqeeya wakhtigooda iyaddoon wax lacag ah la siin. Mutadawiciinta waxay wax ugu biiriyaan si loo xaqiijiyo inay jiraan hawlaha kala duwan oo wanaagsan iyo in 4H ay tahay meel wacan oo la joogo. Waxaa jira hawlo badan oo ay tahay in laga fuliyo gudaha naadiga 4H-, ay ka mid tahay wadista baabuurka, karinta iyo noqoshada caawiye qof wayn ah. Ku tadawucida si loogu shaqeeyo faa'iidada naadiga 4 waxay ku siin doontaa khibrado badan oo wanaagsan, marka sidoo kale ay kuu oggolaanayso inaad wax ku biiriso bulshadda. Dedaalkaagu waxa uu noqon doonaa mid si wayn loo qiimeeyay!





Badbaado iyo wanaag!

Dhammaan naadiyada 4H waxaa ka go'an siinta carruurta iyo dhalinyarta fursaddo badbaado iyo wanaag ah. Waxaanu leenahay haykalo cad oo diyaar ah oo si firfircoon u shaqeeya si loo xaqiijiyo inaan cidka la faquuqin. La taliye kasta oo naadiga ah iyo hogaamiyaha naadiga ee la shaqayanaya xubnaha 4H waa inay haystaan oggolaanshaha shahaado boolisku bixiyay. Waalidka iyo masuulada sidoo kale waxay ka qaban karaan xafiiska 4H, ama waxay ka qayb qaadan karaan oo wax ugu biirin karaan sidii la taliyayaal iyo caawiyeyaal.



Waa imsa qiimaheedu?

Naadigu waxa uu ku dedaalaa inuu qiimayaasha hoos u dhigo sida ugu suuragalsan.

Khidmada xubinimada

Qof kastaa waa inuu bixiyaa kharashka xubinimada sanadlaha ah si uu u noqdo xubin oo uga qayb galo hawlaha 4H, laakiin aad ayaa lagu soo dhowaynayaa inaad isku daydo hawlahayaga marka koowaad ka hor inta aanad xubin noqon.

Kharashyada kale

Qof kasta oo ka qayb galaya kaamamka ama koorsooyinka tababarka waxa uu wadaagaa kharashka qalabka, safarka, macalimiinta, iwm. Xubnaha 4H waxay haystaan fursadda ay kaga qayb qaataan kaamamka kala duwan sanad kasta. Kuwan waxaa ku jira kaamka qofka la tababarayo, kaamka degmadda, kaamka wadanka iyo kaamka Nordiga. Kuwan shaaca ka qaaday kaam degida dhexda 4H intabadan waxay sii wadaan inay yimaadaan kaamamka sanadba sanadka ka dameeya.



Sawirka: 4H Sogn og Fjordane



Deegaanka iyo Dharka

Badanka hawlaha, ma jiro qalab gaar ah oo loo baahanyahay. Waa, si kastaba ha ahaatee, fikrad wanaagsan in la xaqiijiyo inaad xidhato dhar ku habboon hawsha. Haddii wax la dubayo, tusaale ahaan waxaad u baahan doontaa maro laabta lagu xidho, waana wax macquul ah in la xidho dharka biyaha celiya iyo kabbo adag marka tamashalaha loo baxayo. Dharka caadiga ah, oo leh surwaal dheer iyo koofiyado, waxay ku habboontahay hawlada badankooda.



Sawirka: Øystein Julien



Sawirka: Geir Aardalsbøkke



Sawirka: 4H Sogn og Fjordane

Ujeedada 4H waa in la kobciyaa kuwa firfircoon, dhalin yaro hawl kar ah oo leh dareenka masuuliyada iyo tixgelinta

Hadafka 4H waxaa lagu muujiyay dhexda ballanta 4H.

“Waxaan ku ballan qaadayaa madaxaygu inuu si cad u feker, wadnahaygu inuu daacadnimo wayn lahaado, gacmahaygu qabtaan adeeg wayn, oo caafimaadkaygu noqdo nolol ka wanaagsan, naadigayaga, bulshadayda, iyo wadankayga.”



Ma jeclaan lahayd inaad ku biirto 4H?

Nagala Soo xidhiidh:

Naadigaaga maxaliga ah ee 4H waa:

.....

Qofka lala xidhiidhayo:

.....

Lambarka telefoonka/cinwaanka iimaylka:

.....



www.4h.no